

Guryo badan oo ka wanaagsan kuwii hore loogana talagalay dadka reer Victoria

Mashruuca Weyn ee Guryeynta wuxuu qaadayaa tillaabada weyn ee xigta

Sebteembar 2024

Guryo cusub oo ka wanaagsan kuwii hore una dhow sar dheer

Dadka dib-u-dejinta loo sameynayo waxay sidoo kale qabsan karaan ballan ay kusoo kormeerayaan guryaha cusub waxayna codsan karaan in la siiyo foomamka lagu dalbanayo dib-u-dejinta. La hadal xubin ka tirsan kooxda wax rareysa.

Guryo cusub oo xaafaddaada ku yaal oo suurtagalin kara in lagu raro



Elizabeth Street, Richmond

Waxaa la dhameystiri doonaa Luulyo 2025



Victoria Street, Flemington

Dhameystiran



Abbotsford Street, Waqooyiga Melbourne

Dhameystiran



Bangs Street, Prahran

Dhameystiran

Wax badan ka ogow oo la soco wixii ku soo kordha barnaamijka

1. Dadka dib-udejinta loo sameynayo waxay wadahadal la yeelan karaan xubin ka tirsan kooxda wax rareysa
2. Dhammaan dadka deegaanka way is-diiwaangelin karaan si ay ula socdaan wixii soo kordha ee ah kulammada macluumaadka, wixii warar dheeraad ah iyo ogeysiisyo, iyo fursadaha laga qeybgeli karo, ama
3. Weydii su'aal:

Booqo bighousingbuild.homes.vic.gov.au

Sawir QR koodhka (hoos eeg)

Wac 1800 716 866 si aad ula hadasho xafiiska guryeynta deegaankaaga (9am ilaa 5pm Isniinta ilaa Jimcaha). Turjubaano ayaa diyaar ah haddii loo baahdo

iimaylka enquiries@homes.vic.gov.au

Ka qaybgal ballamaha bulshada ee laisku xog wareysto.

Waqtiyada iyo taariikhaha waxaa lagu soo qori doonaa mareegahayaga iyo boorarka ku dhegan dhismeyaal

Fasiraada



bighousingbuild.homes.vic.gov.au

Waxaa oggolaaday oo daabacay Dowladda Victoria, 1 Treasury Place, Melbourne. © Gobolka Victoria, Homes Victoria, Sebteembar 2024.

Daabacaad ay maamusho Finsbury Green (HV021424)

Dawladda Victoria waxay qaadaysaa talaabada weyn ee xigta si ay u dayactirto guryaha bulshada/dowlada ee duqoobay ee Melbourne oo dhan taasoo qayb ka ah Mashruuca Weyn ee Guryaha Victoria.

Guuritaanka oo ka bilaabanaya South Yarra iyo Richmond

Waxaan kula talinay dadka degan dhismayaasha soo socda in howlaha guuritaanka ay dhowaan bilaaban doonaan, iyadoo raritaanku uu dhamaanayo Febraayo 2026:

- 259 Malvern Road, South Yarra
- 139 Highett Street, Richmond
- 111, 119 & 127 Elizabeth Street, Richmond
- 6 & 8 Anderson Court, Richmond
- 1-5, 7 & 9 Williams Court, Richmond

Taariikhda dhamaadka raritaanka ee Flemington iyo North Melbourne ayaa lagu dhawaaqay

Qorshaha lagu rarayo dadka degan dhismayaasha soo socda ayaa bilaabmay 2023. Dadka degan dhismeyalkan waxaa lagu wargeliyay in raritaankooda lasoo gabagabeyn doono Sebtembar 2025:

- 120 Racecourse Road, Flemington
- 12 Holland Court, Flemington
- 33 Alfred Street, North Melbourne

Ma jiri doonaan raritaan kale oo bilaabmaya bisha Luulyo ee sanadka 2026 ka hor

Dadka degan dabaqyada 37 ee soo haray lama bilaabi doono raristooda inta ka horeysa Luulyo 2026. Dib ayaan idin kala soo xiriiri doonaa markay wax soo cusboonaadaan.

Guryo bulsho/dowlad oo kuwii hore ka fiican oo laga bixin doono Carlton

Shaqada mar hore ayayba bilaabatay walina way socotaa taas oo lagu hirgalinayo 231 guri oo cusub, casri ah, isla markaasna tamar hufan leh iyo guryo si sahlan lagu geli karo oo ku yaal Elgin Towers, Carlton. Dadka deegaanka iyo bulshada ayaa laga qeyb galiyay howlaha naqshadeynta qabyada ah. Guddi wada-tashi bulsho ayaa dadka deegaanka iyo bulshada loo xil saaray inay ka qeybgeliyaan bulshada howlaha dib-udhiska.



Talaabooyinka raritaanka



Helista xog dheeraad ah

Waxaa laga yaabaa in aadan hadda guureyn laakiin waxaad heli kartaa xog dheeraad ah oo waxaad arki kartaa waxa ka dhacaya xaafadaha kale.

37 Dabaq
Dhammaan goobaha kale



Diyaargarowga

Bilow inaad ka fikirto waxa aad uga baahan tahay gurigaaga cusub. Kooxdayada dib-u-dejinta ayaa kaala shaqayn doonta sidii aad u heli lahayd guri kugu haboon iyaddoo wax kasta lagu saleynayo baahidaada iyo dookhaaga.

Richmond

139 Highett Street
111, 119 & 127 Elizabeth Street
6 & 8 Anderson Court
1-5, 7 & 9 Williams Court

South Yarra

259 Malvern Road



Rarista

Marka guri kugu haboon la helo, waxaan kaa caawin doonaa howlaha guuritaanka, oo ay ku jiraan inaan ku siino baakado alaabaha lagu gurto iyo inaan kaa taageerno dhammaan kharashyada guuritaanka iyo adeegyada ay tahay inaad dib usoo xirato.

Flemington

12 Holland Court
120 Racecourse Road ?

Waqooyiga Melbourne

33 Alfred Street



In wax kasta la idinla soo socodsiyo

Inta ay socoto howlaha dib-udhiska waxaan markasta idinla soo socodsiin doonaa wixii kusoo cusboonaado mashruuca iyo farsadaha lagu hagayo naqshadeynta guryaha cusub.



Dib usoo noqoshada

Waxaad xaq u leedahay inaad soo noqoto iyadoo lagu salaynayo baahiyahaaga joogtada ah, u qalmida, iyo hadba sidey guryaha cusub kuugu haboon yihiin.

